



miyaanu ahayn Ilaahii ku socodsiyey lugaha aduunyada mid awooda inuu ku socodsiyo wajigiisa maalinta qiyaame?

Qataada Allaha u naxariiste waxaa laga wariyey inuu yiri: Anas Binu Maalik Allaha ka raalli ahaade wuxuu noosheegay in Nin yiri: Nabiga Alloow, sidee Gaalka loo keenin Maxsharka isagoo wajigiisa ku socda? wuxu yiri: (miyaanu ahayn Ilaahii ku socodsiyey lugaha aduunyada mid awooda inuu ku socodsiyo wajigiisa maalinta qiyaame?) Qataada wuxuu yiri: haa, Cisada Rabigay ayaan ku dhaartaye.

[Xadiis Saxiix ah.] [Xadiis la isku waafaqay]

Nabiga scw waxaa la waydiiyey: sida Gaalka loo keenin maxsharka maalinta qiyaamaha isagoo wejiga ku socda?! wuxuu yiri Nabigu scw miyaanu ahayn Ilaahii ku socodsiyey labo lugood adduunka mid awooda inuu ku socodsiyo wajigiisa maalinta qiyaamaha?! Ilaahay wax walba waa awoodaa.

<https://sunnah.global/hadeeth/so/show/65068>

